



بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله رب العالمين، والصلاة والسلام على محمد وعلى آله وأصحابه

Ujeeddo: Tacsi ku aadan geerida ra'iisul wasaarihii Ethiopia Meles Zenawi

Ma dhinte waa ilaahay, nolosha iyo geeridana rabbi ayaa abuuray,

Jamaacada Al-Ictisaam bil kitaabi wasunnah waxay tacsi u diraysaaa dhammaan shacabka Itoobiya gaar ahaana ahaladii iyo qaraabadii uu ka tagay ra'iisul wasaarihii hore ee itoobiya Meles Zenawi.

horaantii xukunkiisa in kasta oo uu Meles Zenawi ciriiri badan uu ku hayey muslimiinta ku dhaqan itoobiya hadana ilaahay waxa uu waafajiyey dhammaadkii maamulkiisa in uu heshiisyo wax ku ool ah la galo culumada iyo ducaadda ku nool labada dal ee Itoobiya iyo Soomaaliya.

ma ahan wax qarsoon in Meles Zanawi uu ogolaaday in culumada iyo macalimiinta qur'anku ay dib ugu soo laabtaan guryahoodii ay ka bara kaceen, waxaana xiligaas kadib dib u bilowday dacwadii saxiixa ahayd ee mudada ka maqnayd dhulka ay degto soomalidu ee Itoobiya ka dib markii ay halkaas ku noqdeen culumadii iyo ducaadii ayada oo laga amba qaadayo heshiiskii ay wada gaareen Dowladda Itoobiya oo uu hogaaminayey Meles Zenawi iyo ururkii UWSLF.

Jamaacada Al-Ictisaam bil kitaabi wa sunnah waxay ugu baaqaysaa sii haya xilka ra'iisul wasaare ee Itoobiya Mr Hailemariam Desalegn

- in uu adkeeyo heshiiskii wax ku oolka ahaa ee dhexmaray dowladda Itoobiya iyo Jabhaddii UWSLF iyo in dadka ku nool dhulka soomaali galbeed ay helaan xorriyaadka aasaasiga ah, sida arrimaha diinta, waxbarashada, xorriyadda hadalka, xorriyadda Dhaqaalaha.

- in la sii daayo maxaabiista siyaasadda ee lagu xiray dagaaladii dhex maray dowladda Itoobiya iyo ururka UWSLF sida uu dhigayey heshiiskii labada dhinac, ayadoo illaa iyo hadda ay xabsiyada kuj jiraan dhalinyaro fara badan oo ka tirsanaa ururka UWSLF.
- in sidii lagu heshiiyey ay culumada iyo ducaadda dhulka ay degto soomaalidu u sii wataan fidinta diinta islaamka ayadoo xiligaan hadda la joogana uu qalalaase diimeed ka taagan yahay gudaha dalka Itoobiya.

Madaxa Gudiga Fulinta Jamaacada Al-Ictisaam bil kitaabi wa sunnah

Sh Axmed C/Samad



الشيخ / أحمد عبد الصمد
رئيس المجلس التنفيذي

المقر الرئيسي: Garwo – Somalia

التلفون: +252-584-3311

نقطة: +252-907-99987

Web: www.ictisam.com

Email: madaxafulinta@ictisam.com